

SIDA LOO

# Tageero Caafimaadka Dareen-Bulshadeedka Ilmahaaga

*Sideed u taageeri kartaa ilmahaaga inta lagu jiro ku -noqoshada dugsiya iyo sannad dugsiyeedka?  
Waa kuwan qaar fikrado ah.*

## La Hadal Ilmahaaga. Waxaad waydiin kartaa:

- Sidee u aragtaa ku noqoshada dugsiya?
- Ma waxaad ka walwalsan tahay baa jira?
- Muxuu ahaa wax farxad leh ama adag maanta?
- Miyuu jiray qof kugu jeesjeesay ama kuu cagajugleeyey?
- Miyaa wax su'aalo ah ii haysaa?

## Isla sameeya waxqabad caadi ah ee cusub. Ka hadal sida loogu jiri karo caafimaad:

- Jimicsiga iyo seexadka/nasashada.
- Cuntada wanaagsan iyo fuuqbaxa.
- Maaraynta wakhtiga lagu qaato shaashadaha (taleefanka/TV).

## Haddii uu ilmahaagu tabasho ka hayso badbaadada ama ku noqoshada waxbarashada fog:

- Dhageyso tabashadooda.
- La wadaag talaabooyinka ay ka qaadi karaan badbaadada.
- Si daacad ah ugu jawaab su'aalaha.
- U xaqiiji inay wali jiri karto wax aan la ogeen.
- La wadaag macluumaadka aad runtii hayso.

## Haddii aad u baahan tahay taageerid dheeraad ah, ogow sida loo:

- La xiriir la taliyayaasha ama cilmi-nafsiga dugsiya.
- Helo ilo wax ka qabta walwalka, walaaca, dhimirka, ama ku xadgudubka.
- La xiriir qoysaska kale.

## U firso waxa khuseeya ilmahaaga ee ah :

- Niyadooda iyo dareemadooda.
- Dabeecadaha.
- Aragtidooda ah xaga dugsiya.

Haddii aad aragto isbeddello ama aad qabtid su'aalo, kala hadal macallinka ama dhakhtarka ilmahaaga.

## Dhiiri geli ilmahaaga:

- Adigoo isdajiya iyo adigoo taageera.
- Adigoo ka caawinaya in ilmahaagu ay magac u yeelaan dareenadooda.
- Adigoo diirada saaraya waxyaalaha wanaagsan.
- Adigoo la wadaagaya sababta ay ilmahaagu ay qof gaar ah u yihiin iyo sababta aad ku faanayso ilmahaaga.
- Idinkoo wax isla sawira iyo wax isla qora.

## Haddii uu ilmahaagu tabasho ka hayso kala fogaansaha:

- Dhageyso tabashadooda.
- Ku tababar kala fogaansho wakhtiyo yar ah.
- Samey is-macsalaameyn joogto ah.
- Ugu dir fariin gaar ah ama sawir boorsadooda garbaha.
- U xaqiiji inaad u xiisi doonto sidoo kale.

## Markaad la hadleyso macallinka ilmahaaga, la wadaag wax khuseeya ilmahaaga ee ah:

- Awoodaha iyo caqabadaha.
- Siyaabaha loola tacaalo walaaca/istereska.
- Su'aalaha iyo walaacyada.
- Danaha iyo hibooyinka.

Waxad xaq sharci kaga leedahay dugsiyaaga inaad macluumaad ku hesho luqadda gurigaaga. U sheeg dugsiya sida ugu wanaagsan ee lagula soo xiriiri karo iyo haddii macluumaadkaaga xiriirinta ay isbeddelaan.

Ka eeg ilo dheeraad ah ee ah luqaddo kala duwan: [ColorinColorado.org/family-support](https://ColorinColorado.org/family-support)



¡Colorín  
colorado!

